Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya
Golaha Shacabka

Hadal-qorolaaka kal.6-aad
Documentiga Kul.6-aad kul.13-aad 21/06/2015

Kalfadhiga 6-aad
Kulankiisa 13-aad.Saac.Fur. 11:50ghSaac. Xir.3:30gd.
Guntinta (Qourum) -143Xildh.
Ajendaha

1. **Furintaanka Aayadaha Qu'aankaKariimka**
2. **Ansaxinta Ajendaha**
3. **Su'aal Oraaheed:Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda**
4. **Dood Furan: Xaaladda Dhaqaale iyo Maaliyadda Dalka.**

1.Shir-Guddoomiye ,Guddoomiye K/X.2-aad Baarlamanka JFS Mudane Mahad Cabadalla Cawad

Waxaa shirka furey Guddoomiye K/X. 2-aad ee Baarlamanka JFS Mudane Mahad Cabdalla Cawad waxaa lagu furey Aayadaha Qur'aanka kariimka uuna akhriyey Xildh. Sheekh Shaacir.

Guddoomiyaha wuxuu sheegay in maanta 4 -Ajende ay u yaaliin ,wuxuuna ka codsadey in Xildh. ay ansaxiyaan,Xildhibaanaduna way ansaxiyeen .

2. kadib , guddoomiyaha wuxuu sheegay in ay sharaf u tahay in ay u yeeraan Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda iyo Agaasiimaha . Iyadoo ay tilmaameysa qodobka72-aad iyo 78-aad ee Xeer-hoosaadka ay tahay in su'aalo 90 daqiiqa ah ay Wasiirku weydiinkaraan Golaha Baarlamanka.

3. Guddoomiyaha wuxuu ku soo dhaweeyey Wasiirka Wassaradda Maaliyadda Mudane, Maxamed Aadan Ibraahim (Farkeedti).

4.Wasiirka Maaliyadda,wuxuu sheegay in uu aad ugu faraxsanyahay in maanta uu horyimaado Golaha Baarlamanka. Wuxuu intaa ku darey in ay kutala jiraan in loo gudbo habka maamulida lacagta sida loo hormarin lahaa waa sharciga lagu maamulaayo Maaliyadda.

5. Guddoomiyaha wuxuu u yeeray Xildhibaanada Motionka soo gudbiyey :

Xildh. Ibraahim Suleymaan, wuxuu sheegay in iyaga ay soo gudbiyeen Motionka ka dhanka ah Wasiirka wasaaradda Maaliyadda Mudane (Ferkeeti),wuxuna soo jeediyey in ay si toos ah uguda galaan Su'aalaha la weydiinaayo Wasiirka.

Xildh.Fadhaye wuxuu sheegay in uu ku waafadsanyahay uuna sakangareeyey Motionka.

6.Guddoomiyaha , wuxuu sheegay in xeer-hoosaadka ay ku xadidantahay in su'aalaha la weydiinayo Wasiirka 1-daqiiqo keliye ay tahay ,jawaabtana ay tahay 3-daqiiqo.

7. kadib,waxaa bilaabatey su'aal weydiintii Xildhibaanadda ay weydiinayeen Wasiirka W/Maaliyadda .

Su'aal

Xildh. C/llaahi Jaamac, wuxuu sheegay in 5-tii bilood ee ugu danbeysey ay soo gashay W/Maaliyadda lacagta dhan USD 45Million waxaa hadda maqan lacag gaareysa USD 21-Million ,Lacagta shaqaalaha iyo Ciidamada xageebaa kaga mudan ee lagu bixiyey?
-Canshuur dhaafka la sameeyey yaa loo sameeyey?
-Canshuurta la uruuriyo xagey martaa?
Xildh. C/llaahi Abshirow,
- Maxaad u raaciweyseyn Xeerka Qoondada Miisaaniyadda Sannadka 2015ka?
- Maxaad u jebiseyn Xeerka Qoondada Miisaaniyadda uu Madax-weynaha Ansaxiyey?
- Warqadda ay soo saareyn Xafiiska Hanti-dhawrka Guud waxaan ognahay in bisha Maarso ……
- Sideebaad mar labaad u dhihikartaa hala furo oo loo furikaraa?

Xildh. Xuseen Carab Ciise,
-Maxay tahay processes-ka loo soo mariyo W/Maaliyadda ,lacagta Ciidamada Xoogga?
-Mase la xisaabtan saxbaa jira?
-Mise saami baa jira oo aad bixisaan?

JWB.Wasiirka
-Wuxuu sheegay in dakhliga gudaha iyo dibadda sida Miisaaniyadda loo qoondeeyey oo aad ku ansaxis-eyn aanan loo fulin. Miisaaniyadda la ansaxiyey ee dawladda ay aheyd USD 239.9
-Dhakhliga wuxuu ahaa USD 49-Million
-Wuxuu kaloo sheegay in ay kala duwanyihiin Xafiiska Hanti-Dhawrka iyo Maaliyadda .
Hanti-dhawrka wuxuu leeyahay talo bixin iyo in uu baaro Miisaaniyadda.
-Warrant-iga Hantidhawrka In uusan shaqo ku lahayn ayuu sheegay.
-Warqadda Hanti-dhawrka Guud uu soo qorey wuxuu ku sheegay in ay maqantahay USD 31Million.
- USD 16.500 Million waxay ku baxdey Shidaal Hawl-gal.
-Shaqaalaha Mushahaaraadkooda waxaa bixiya World Bank ,hadda waxaa u socda iyaga iyo World Bank Wada hadal ,markii hore heshiis hal sanno ayey aheyd ,balse hadda waxay isla garteyn heshiis Shan sanno ah,kadib marki ay wada saxiixaan ay bixindoonaan dhamaan Mushahaaraadka Shaqaalaha ay leeyihiin.

-Lacagta waxay ku baxdaa sidey u ansaxiyeen Golaha Baarlamanka.
-19-ka feyl uu hanti-dhawrka sheegay waxay tahay in iyaga la weydiiyo .
-Ciidanka waxaa ka maqan 4- bilood ,wixii xaq ah way leeyihiin.
-**Xisaabiyaha Guud Siraaji,** wuxuu sheegay in Habka kharash bixinta Miisaaniyadda Ciidamada Dawla-dda ay si toos ah ay isula xiriiraan ,kadibna si toos ah loogu wareejiyo.

Su'aal
Xildh. Maxamed Iidle Geedi, wuxuu weydiiyey sababta loo keeni waayey Xisaab-xirka Miisaaniyadda ee 5- bilood 2015ka?
-Sababta loo qaadi waayey canshuuraha beriga maxay tahay?
Xildh. Maxamed C/llaahi Kaamil. Wuxuu sheegay in Miisaaniyadii 2015-ka ay iyagu u tahay sideedi hore.
-Seddex biloodkii hore ma keenin Xisaab- Xir .Wax jawaab ahna lagaama haayo?
-Canshuurtii Bariga waa la uruurinayaa bay balantu aheyd ,aaway waxaa uruuriseyn?
-Markii Guddiga Maaliyadda ay ku weydiiyeen Lacagaha Been Abuurka (Feega) ah,maxaad ka ogtahay?
Waan baarayaa ayaad ku tiri Guddiga Maaliyadda ,maxaad ka haysaa?

Xildh. Bashiir Ugaas , wuxuu sheegay in sida lawada ogsoonyahay ay jirto sahay safar oo looga qoond-Eeyey Miisaaniyadda Madaxda Sare. Haddaba maxaa loo qoondeeyey Madax-weynaha iyo Ra'iisul Wasaaraha?
-Lacagtii Baarlamankii hore maxaa loo bixin waayey?
-Lacagta meesha uu ku sheegay wasiirka ,waxaa ku jirta Lacagta Goboladda ,maxay tahay ?
-USD 49 Million,inay baxdey ayaad sheegtey kuna kharash gareysey waxyaabo muhiim ah ,maxay yihiin waxyaabahaas?
Xildh. Maxamed Cumar Dhalxa, wuxuu sheegay qaabka ay u soo bandhigeyn ay aad u wanaagsan tahay,wuxuu codsadey in laga daayo duu-duub wax la yiraahdo oo loo kala dhig-dhigo.
-Sahay Safarka in la tafaaruqeeyo ?
-USD 5 Milion oo deeqda yaa loogu deeqey ?
JWB. Wasiirka
-Wuxuu sheegay in shirar uu la wadaagey Guddiga Maaliyadda ee Baarlamanka.
-Wuxuu sheegey oo kale in aysan is waafaqsaneyn Dakhliga iyo sidii wax looga bixiyey.
-wuxuu sheegay in hadda ay wadaan dib u habeyn Miisaaniyadeed,waxayna marka hore soo marindoo-naan Golaha Wasiiradda,
-Lacagta been abuurka ah waxaa ku shaqa leh Bankiga Dhexe.
-Canshuuraha beriga waxay sheegeyn in ay wadaan dad loo soo tababarey .
-Xafiiska u baahan sahay safar ,waxay ku qorantahay sida Miisaaniyadda loo ansaxiyey
-Lacagtii USD 1.475 Million ee Xildhibaanadii hore waxaa loo qoondeeyey Ciidamada kala duwan ee Qaranka Soomaaliyeed.
-wuxuu sheegay in dhamaan la jumleysan yahay wax kastana lagu saleeyey Miisaaniyadda.

-Madaxdana xaq bey u leeyihiin inay sahay safar helaan iyo Xildhibaanadaba.

Su'aal

Xildh. Fadhayo,

-wuxuu weydiiyey in la caddeeyo meesha ay ka baxdey lacagta maqan oo aan Jumlo loo sheegin?

-wuxuu weydiiyey in la caddeeyo Cidda ay ku baxdey USD 21 Million meesha ay ku baxdey, sida Ciiddamada , Shaqaalaha , yaase ka mudan oo la siiyey?

-3-dii bilood oo looga tala galey Xildhibaanadii hore meesha aad apologize lagaaga siiyey baa la rabaa marka uu jirey shirka Golaha Wasiiradda?

-Maxaad ka wada hadasheyn?

Xildh.Axmed Ducaale Geelle(Xeef) , wax isku duuduub ah lama doonayo :

-USD 22 Million waxaad siiseyn Ciidanka Xoogga

-USD 11 Million waxaad u siiseyn Raashin iyo Mushahaar

-USD 27Million waxaad siiseyn Xildhibaanada Baarlamanka

-USD 3Million waxaad ku bixiseyn sahay safar.

-Lacagta USD 21Million,xagey ku maqantahay , waa inaan ogaanaa meesha ay ku maqantahay?

-Canshuur ma qaado Wasaaradda Maaliyadda?

-dadka shirkadaha leh sababta loogu qaadi waayey canshuurta ayaa la idiinka rabaa Caddeynteeda?

-Canshuurta la rabey in la qaado lama qaado ,maxad dadka ugu qaadi weyseyn Canshuurta ?

Xildh. Daahir Amiin Jeesaw, wuxuu sheegay in dalka uu ka kooban yahay 18 Gobol 12 Gobol waa xur -Maxaa sababay in Canshuurta Dalka laga qaadi waayo?

- waxaa la ogyahay in aad handadeyn Hanti-dhawraha Guud , Maxaa ka jira?

JWB. Wasiirka

Wuxuu Idmey Agaasiimaha Waaxad Miisaaniyadda –Iraad, wuxuu sheegay in ay si wanaagsan u baxayn Dakhliga iyo Kharashka

-5-tii bilood Xisaab Celinteeda waxaa loo gudbiyey Guddiga Maaliyadda.

-Dakhliga soo galey wasaaradda Maaliyadda waa USD 49 Million USD 22 Million way baxadey waxayna ku baxdey si sharci ah, waxaana la siiyey USD64Milion institution-iska loona siiyey hawl-socodsiintooda iyo Sahay safar.

-Lacagaha Deeqaha waxaa loo qeybiyaa :100/15 –Dawladda Hoose,100/1.5 B/dhexe,100/0.5 B/Ganacsiga

Wasiirka ,wuxuu intaa ku darey ,in taasi jawaabta u tahay su'aasha Xildh. Fadhayo.

-Running Cost , USD 64 Million waxay ku baxadey Xafiisyada Dawladda oo Dhan .

-ma ahayn apologize ee waxay aheyd wax kale.

-anaga uurkubale ma nihin balse wixii tafaasiil ah waan idiin helikarnaa haddaad noo timaadaan.

-Anaga waxaan qaadaney Federalisim Goboladda hadda ayey dhismayaan kheyraadka Dalka iyo canshuuraadkooda hadda ayey socdaan wada hadalkooda .

-Lacagta Suudaan Taalo waxaa loo baahanyahay in lagu soo qaado warqad caddeyn ah.

-Warqadda uu qorey wuxuu ku sheegay in ay tahay arin dastuuri ah xilna ka saaranyahay umana arko in ay khaldantahay oo ay sixid u baahanatahay .

Xisaabiyaha Guud siraaji.,wuxuu sheegay in ay u oolin bankiga dhexe bisha Dec. 2014 lacag USD 2 Million balse lacagta u taala ay aheyd USD.2 kun keliya.

Su'aal

Guddoomiyaha Mudane Mahad, wuxuu weydiiyey in uu sheego Wasiirka awooda looga baxsadey Bankiga dhexe lacagtii Xildhibaanadii hore ee aheyd USD 1.500 Million?

JWB.

Wasiirka , wuxuu sheegay in uu golaha u keenidoono Xisaab-Xirka Miisaaniyadda Miisaaniyadda 2014 ka.

-Xildhibaanadii hore lacagtooda wuxuu sheegay authoratiga looga soo saarey Bankiga Dhexe waqtigaa in uu ka maqnaa Wadanka, balse ay aheyd go'aan xukuumadeed.

Su'aal

Xildh. Maryan waxay sheegtey in ay wanaagsantahay in maanta laga hadlo danahooda iyo danta Qaranka laakiin ma aha in lays handado.

Xildh.Goodir, wuxuu sheegay in warkiisa hadaladiisa ay is dhaafsiisanyihiin ,uuna isku wareejiyey laba Madax xisaabeyd .wuxuuna sheegay in uu raacey habraaca kharash bixinta,laakiin Miisaaniyadda uu Golaha u soo gudbiyey ,wuxuu mudnaanta 1-aad uu siiyey Sahay Safarada Mas'uuliyiinta ,Maxay ku dhacdey?

Mushahaaraadkii Xildhibaanadii hore ee lagala baxay Account-ka Bankiga Dhexe ,maxaa sababey in aan lala tashanin ciddii ay khuseysey ?

Xildh. C/ramaan ,wuxuu sheegay in iyaga ay soo sameeyaan Miisaaniyadda Xukuumadda ay Xildhibaa-nadana u ansaxiyaan,haddaba waa ciddee cidda awooda u leh ee wax ka bedelikarta Miisaaniyadda?

Xildh. Cabdi xaashi , wuxuu sheegay in ay la socdaan in lacagta si sharci ah ay Bankiga Dhexe ku tagtey cidda awooda u leh in ay dib u soo celiso waa kee?

JWB.

Wasiirka, wuxuu sheegay in aysan jirin wax Madax wareejin ah oo la sameeyey.

-Xildhibaanadii hore lacagtooda waa la siinayaa.

-Guddiga Maaliyadda wax xafiis ah oo laga siiyey W/Maaliyadda ma jirto.

-Miisaaniyadda 2015ka, lacagta canshuurta ee la uruurinaayo waxaa raashin ahaan loo siiyaa Ciidamada Xoogga.

-Wax madaxyo isku warejin ah ay W/Maaliyaddu ay sameysey ma jirto.

Su'aal

Xil. Dr. Cilmi Maxamuud Nuur, wuxuu sheegay in Miisaaniyadda 100/50 ay baxdey ,dood badana aynu soo mareyn iyaga iyo wasaaradda Maaliyadda .Miisaaniyadana waxay noqoneysaa xuquuq mar haddii ay Golahu ansaxiyaan . lacagta sahay safarka ay la egtahay USD 4 Million , Deeqaha waxaa ka taagan Crises maxay wasaaraddu dadaal ugu jirtaa in ay bixiso dadka xuquuqdooda si ay u heli lahaayeen. Cidda ka muhiimsan Shaqaalaha iyo Ciidamadda waa kuwee?

Xildh. Yuusuf Maxamed ,wuxuu sheegay in wasiirka laga rabo wixii la weydiiyey in uu ka jawaabo,

-waa inaad caddeysaa ciddii ku amartey .?

-USD 800 kun inoo caddey waxa ay ku baxeyn ?

-Hay'adda Bii'ada waxay hoos tagtaa Xafiiska Ra'iisul-Wasaaraha. Waxayna hadda joogaan Xafiiska Xannanadda Xoolaha ,warbixintii Guddiga Maaliyadda oo la ansaxiyey waxaa ku qoran in laga wareejiyo Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha loona wareejiyo Xafiiska Xannaanadda Xoolaha,arinkaas faaf-faahin ka bixi?

Xildh. seynab Maxamed Caamir, Maxay tahay lacagta ay ku kordhiyaan Mushahaaraadka Ciidamada

-Dawladda Mareykanka iyo Reer Yurub?

-Lacagta Shaqaalaha Rayidka ah oo maqaadan 4 Bilood Mushahaarkooda ,maxay ku dhacdey?

-in la caddeeyo lacagta Gobolada la siiyey ?

JWB

Wasiirka,

-Lacagta haddey maqantahay maxaa loo baqaamin weeyey ,dawladda safar ayey ku xirantahay safarada la galey waa kuwo laga maarmi waayey.

-Lacagaha dabagalka aan ku sameyney waa kuwa Imaaraadka Carabta ,kuwa kalena waan wadnaa?

-Lacagta Mushahaaraadka shaqaalaha ,wuxuu sheegay in uu horey uga jawaabey waxaana bixiya World Bank.heshiiskii horey loola galey world Bank waa Hal Sano, hadda heshiis ayaa u socda muddo Shan sanno ah waxaana dhiman keliya saxiixyadii.

-**Tan Hay'adda Bii'adda waxaa ka jawaabeysa Agaasiimaha Guud Marwo Aamino sheekh Cusmaan:**

-waxay sheegtey Hay'adda Bii'adda hadda ay si ku meel gaar ah ay u hoos tagtaa Xafiiska Ra'iisu Wasa-araha ,mardhaw ayaa loo wareejinayaa xafiiska Xannaanadda Xoolaha.

JWB. Wasiirka.

-Lacagaha taageerida Ciidamada la siiyo ma aha mid nooga jirta Miisaaniyadda.

-Mushaharaadka shaqaalaha waxaa 100/95 bixiya World Bank.

-Shaqaale ayaan Mushaharaadkooda ka bixino Running Cost-iga .

Su'aal

Xildh. C/fataax Mataan, wuxuu sheegay in cidda codka laguugu doortey leh mudane wasiir waa Xildhibaanada,marka su'aalaha si toos ah ugu jawaab.

-Goboladda kharashyadda ku baxay caddeyn ka bixi Gobolka kasta inta ku baxdey?

-hawgaladda dhawrka ah ee lagu bixiyey lacagta aad sheegtey ,sheeg meelahay yihiin?

-Wasaaradda Gaashaandhiga maxaa sababey inaad si toos ah ula macaamishaan?

-Lacagta lagala baxay account-ka ee ay lahaayeen Xildhibaanadii hore Ciddii amartey in lacagtaasi lala baxo Cadeey?

Xildh. Jaamac Axmed Maxamuud wuxuu sheegay Inta su'aalo ee la weydiiyey ma jirto mid uu si sax ah ugu jawaabtey.

- in 6-bilood uu meesha joogay wasiirka wax kasto waxay noqdaan Negative.

- Canshuraha la qaado waa sidooda ,haddaba maxaa isbedelay?

Xildh. Maxamed Cabdi Yuusuf, wuxuu sheegay in Miisaaniyadda uu wasiirka u soo bandhigay laba arimood ayaa ka maqan :

-Gunnada Sahay Safarka oo ku baxadey USD 3.700.000.00

- In caddeyn laga bixiyo inta safar ee la baxay

-Safarkasto inta ku baxdey iyadoo cad-cad.

-Lacag USD 5.5Million oo ah deeq la siiyey Hay'adaha wuxuu sheegay in ay rabaan Caddeyn Hay'ad kasta inta ku baxdey?
Gunnoyinka sahay Safarka ee la isticmaaley waa USD 3.7Million ,waxaa jirta in lacago badan layska qaato in details ay ugu baahanyihiin .

JWB. Wasiirka ,
Wuxuu sheegay in su'aalahaan uu horey ugu jawaabey ,4- taan bilood oo uu joogey in ay isbedeleyn 50% dakhligii dibadda laga helijirey lama haayo ,taasoo horey u dhici jirin , wixii tafaasiil ah oo kale ee laga rabo sahay safar iyo iwm. Ayadoo qoraal ah ayey Guddiga Maaliyadda u soo gudbinayaan .
Su'aal
Xildh. Axmed Maxamed(Toow).
-Dhakhligii Dibadda aan ka sugeyney Sababta ay u istaagtey 49% ,maxaa sababey ma musuq-maasuq baa nalagu hayaa ?
-Goboladda kharashyada ku baxa ,ma loo simanayahay ,degmooyinka qaarkii adeegii bulshada gaarin ayaa jira ,sida degmooyinka qaarkii Kiilo sonkor waxay mareysaa USD 3.5 .
Xildh. Cusmaan Muqtaar.wuxuu sheegay in go'aanka Baarlamanka oo la bedelay ay tahay danbi? In shaqaalaha deyn qaataan maxaa keenay?
-waxaa jira in ay maqleyn lacagta Account-ka lagala baxay in ay tahay amar Madax-weyne, arintaas maxaa ka jira?.
Xildh. Daahir Saleebaan, wuxuu sheegay in la jebiyey Xeerka kharash bixinta **,**Xeerka la jebiyey iyo Miisaaniyadda la soo gudbiyey Xisaab-Xirka 6 bilood ayey ku caddahay.sahay safar xafiis kasta iyo wixii ku baxa ,haddana mala awaal ayaad sameysaan maxaa idiinku kalifay?
-Jan. ilaa Dec. qoondada Miisaaniyadda oo la soo gudbiyey Madax-xigaha 22. oo ah kabis Miisaaniyad-eed,waxaa la isticmaaley USD. 1.2 Million .
-Hanti-dhawrka wuxuu qabtey shaqo badan wuxuu noo soo sheegay in la isticmaaley USD 31. Million.
-wuxuu kaloo soo sheegay lacagtii Baarlamanka hore in la siiyey ciidamadda Dawladda In la faaf-faahiyo .
-Xisaab xirka 2014-ka ilaa iyo hadda aan la soo marin Golaha Wasiiradda,taasna in faa-faahin laga bixiyo sababta.
Xil.Maxamed Shuuriye, wuxuu sheegay in Wasaaradda Maaliyadda ay sameysatey Madaxa adeega guud ee Dawladda ,taasna in faah-faahin laga bixiyo?
-Lacagta Running Cost-iga ah ee Xafiiska Madax-weynaha ,Ra'iisul Wasaaraha iyo kan Baarlamanka way ku cadyihiin Miisaaniyadda. Running Cost-iga Wasaaradaha kale xagey ka baxayn oo maxaa loo siin waayey?
Xildh. Sareedo, waxay sheegtey in dayac badan ay ka muuqadaan Wasaaradda Maaliyadda ,Cidna haka xishoon xitaa haddi xilka lagaa qaadayo Mudane Wasiir Caddey Cidda amarka bixisey?
JWB. Wasiirka. Wuxuu sheegay in IMF-ta amaantey qaabka lagu maareeyo Maaliyadda Dalka, laakiin waxay sheegtey in Miisaaniyadda wax laga bedelo arintaana wasaaradda way wadaa,
-wuxuu sheegay in isaga wasaaradda Mas'uul ka yahay ,wax kasto sida loogu tala galey ayey ku baxaan.
-Tan Xisaab-xirka 2014-ka wuxuu sheegay in ay soo socoto, hadda waxay ku wareejiyeen Hanti-dhawrka Guud ,iyagana waxay u gudbiyeen Golaha Wasiiradda.

-Markii laga hadlaayo Xisaabaadka waxay leeyihiin Madax iyo Madax-xigeeno.
-Tankale ,wixii tafaasiil ah waxaan la wadaagnaa guddiga Maaliyadda, wixii macluumaad ah waa isku mid sida aan u soo gudbiney .
-Lacagta Running Cost-iga wuxuu sheegay in ay bixiyeen qaar ilaa Marso , qaarka kalana wuxuu sheegey in ay bixinayaa.

Su'aal

Xildh.Nadiifo Cusmaan waxay sheegtey in ay ogyihiin Company badan in ay wadanka ay soo galaan qalabka ay keensadaan canshuur dhaaf wadanka ku soo gasho,markii Company-da hawshooda ay dhamaato , meeshii la rabey in dawladda ay la wareegto , la wareegaan dad private oo khaas ah .
-Qalabkaas canshuur dhaaf ka ah ee hadda ay ku shaqeeyaan dad private ah ,sababta looga qaadi waayey canshuur maxay tahay.

Xildh. C/qaadir Sii-Sii,wuxuu sheegay in lagu celceliyey in dhaqaalaha uu yaraadey, kharashaad bandanna la bixiyey.
-haddaba maxaad mudnaanta u siin weysey Ciidamada iyo Shaqaalaha?
-Maxaad u siin weysey mudnaanta xitaa hal bil.?
-Qorshaha makuugu jirtaa in aad mudnaanta siiso Ciidamada iyo Shaqaalaha?

Xildh.Maxamuud Dhuux, wuxuu sheegay in ay u taalo iyaga sida maamulka u dhacay.
-wuxuu ka codsadey in uu naftiisa u dadaalo oo uu runta sheego?

Xildh.Craxman Suge,
-Mudane Wasiir diyaar ma u tahay in aad qaadato go'aanka ka soo baxa Golaha.

Xildh.Maxamed Rashiid
-Lacagta mar haddey Bankiga dhexe ay timaado ay soo gudubto Xisaabiyaha Guud,waxaa lays weydiina yaa lacag ma taalaa,Qofka ID Car ma leeyahay ,lacagtaas way leeyihiin cid ka soo celinkarta ma jirto.
-Dhinaca dhaqaalaha mar haddii lagu xadgudbo laguma eedeynkaro baarlamanka ee ciddii ka bixisey waa in Maxkamad looga soo celiyaa?

Xildh.Axmed Dheer
-Ma inoo sheegi kartaa lacagta sababta loo bixin waayey?
-Lacagta Ciidamada iyo Boliiska maxaa loo bixin waayey?

JWB. Wasiirka,
-wuxuu sheegay in ay sameeyaan Canshuur dhaaf,ayna rabaan in ay xogdheer ka sameeyaan.
-Shaqaalaha Mushahaarkooda waxaa bixiya Bankiga Aduunka(World Bank),wixii hadda ka danbeeyana ma jiri doonto Mushahaar la waaya,inta hadda ay leeyihiina waa la bixinayaa.
-wuxuu sheegay in uu ku kalsoonyahay wixii sharci uu leeyahay Dalka.
-wuxuu kaloo sheegey Deeqaha loo ballan qaadey weli inayan helin.
- Xisaab -Xirka wixii balance ah in ay keenayaan Golaha Baarlamaanka ayna tahay waajib ka saran oo ay ku shaqeeyaan.
-wuu afka ku xajiyey in ay ku dadaali-doonaan sidii ay ku heli lahaayeen Shaqaalaha iyo Ciidamada mushahaardkooda,si duruufaha adag looga bixo.
-wuxuu ku soo gunaanday in uu aad iyo aad ugu mahadcelinaayo Golaha Baarlamanka.

Kalfadhiga 6-aad kulankiisa 13-aad uu shirguddoominaayey Guddoomiyaha Baarlamanka JFS.wuxuu sheegay in uu shirka xiranyahay saacaddu markey aheyd 3:10gd.